

8TH STREET

— Reconstruction Project —

Dhismaha Waddada oo Dhawaan la Bilaabayo


Qabanqaabada guud ee diyaaarinta mashruuca dib u dhisidda waddada 8th Street ayaa hadda socota waxaana la qiyaasayaa in shaqada dhismuhu ay bilaabato sannadka 2019. Mashruucaan shaqooyinka lagu qaban doono waxaa ka mid ah dib u dhisidda jidka 8th Street, laga bilaabo Hennepin Avenue ilaa Chicago Avenue, hawshaanna sababaha loo qabanayo waxaa ka mid:

- ▶ Si jidka looga dhigo mid ku habboon adeegga dadka lugeeynaya, gawaarida iyo basaskaba.
- ▶ Jidka in laga dhigo mid dadka lugeeynaya ay u mari karaan si nabad ah iyadoo loo sameeynayo meelo ay dadku ka gooyin karaan jidka oo si waanaagsan loo habeeyey loona calaamadeeyey, dhinaca jidka qarkiisa ah ee ay dadku maraanna si fiican loo dhiso lana ballaariyo, laguna xidho nalal si fiican u iftiimiya habeenkii, laguna rakibo aaladda dadka u tirisa waqtga lagu goynayo jidka, laguna beero geedo.
- ▶ In la hormariyo xaaladda gaadiidka dadweynaha ee aagga iyo nawaaxiga jidkaani uu maro iyadoo halkaan laga hirgelinayo dariiq halboowle u ah isagaarsiinta socdaalka gaadiidka magaalada, loona sameeynayo meelo nafis ah oo lagu sugo basaska iyo gaadiidka dadweynaha.



Khariidad muujineysa halka laga hirgelinayo mashruucaan ayaa ku taal warqaddaan dhinaceeda dambe.

Waqtiga Mashruuca



Muddada Mashruuca

Iyo wararka kalee ku saabsanba kala soco bogga internetka www.8thStreetProject.com

Ma toos ula xiriir Maamulaha Mashruuca ee Minneapolis

Steven Hay

612-673-3884

info@8thStreetProject.com

Xadka Mashruuca

